

BARNAAMIJKA SPRWS LAGU CIRIBTIRO SUNTA RINJIGA



Dulmar guud

Barnaamijka SPRWS ciribtirka sunta rinjiga ee Adeegga Biyaha ee Degaanka St.Paul waa biyaha oo lagaga nadiifinayo sunta soo raacda khaka biyaha. Tan iyo 2022, SPRWS waxa uu barnaamijku bedelay in ku dhow 4,500 oo khadka tubooyinka biyaha ee sunta leedhka . Sanadkii 2026, SPRWS waxa ay kordhisay dadaalka lagu bedelayo 2,100 ee tubooyinka biyaha ee laga helay sunta Leedhka iyada oo aan wax kharasha ah laga qaado mulkiilayaasha.


SPRWS waxa ay u adeegtaa ilaa 96,000 guri. Tiro ka mid ah, qiyaastii 17,000 (18%) waa khadka adeegga leedhka iyaga 4,500 (5%) ay yihiin khad adeeg oo aan lagaraneyn waxyaabaha ay ka sameysan yihiin.

Hubi in aad ka soo baxday shuruudaha adiga oo cinwaankaaga ku baaraya Khariidadda Adeegga ee SPRWS:



stpaul.gov/ServiceMaterialMap

Dhulka Lagu Sameynayo Bedelka ee Barnaamijka Sumowga Rinjiga ee 2026



Sidee ayaa sunta Leedhka u raacdaa biyaha?

Sunta ledhka ma aha mid ku jirta biyaha sida kuwa wabiyada, harooyinka, iyobiyaha dhulka hoostooda. Biyaha ka yimaadada sifeynta biyaha ee SPRWS kuma jiraan sunta ledhka. Halka ugu badan ee ay u badan tahay in sunta ledhka kaga imaan karto biyaha waa tubooyinka biyaha ee guriga, halka ay tubooyinku ku kulmaan, ama qalabka tubooyinka ee ka sameysan naxaasta.

Khatarta ka dhalan karta sunta ledhka

- Waxa ay ku ururi kartaa jirka/haddii lagu neefsado ama qofku liqo
- Sunta oo ku ururta jirka waxa ay dhaawac u geysan kartaa maskaxda, habdhiska dareenwadka, unugyada cascada ee dhiigga iyo kelyaha
- Waxaa khatar dheeraad ah ku jira caruurta iyo haweenka uurka leh

Dadaalka la qaaday si loo yareeyo khatarta

Sida loo yareeyo khatarta sunta ka dhalata tubooyinka biyaha ee ledhka, SPRWS waxa ay ku dartaa waxyaabo dabiici ah oo ka sameysan kiimikada orthophosphate. Daawadaas, oo loo adeegsado yareynta mirirka, waxa ay tubooyinka gudahooda ku sameysaa waxyaabo ka hortaga in ay sunta biyaha raacdo. Sidoo kale waxa ay SPRWS la socotaa oo wax ka bedeshaa heerka pH (heerka aysiidha) iyo alkaliinta ee biyaha si looga hortago in ledhku ay biyaha ku milmaan.

Sidee Ayaan Ku Yareyn Karaa Khatarta Sunta Ka Dhalata tubooyinka biyaha ee ledhka?

- Ha cabin oo cunto ha ku karsan biyo tubada laga soo shubay wax ka badan lix saac
- Biyaha qaboow oo socda 3-5 daqiiqo ka hor inta aadan isticmaalin
- Biyaha dhawr daqiiqo ha socdaan ka hor inta aadan ka cabin biyaha tubada guriga
- Biyaha qaboow u isticmaal cunto karinta, cabitaanka, iyo caanaha ilmaha loogu diyaariyo
- Madaxa hore ka bedel tubada biyaha laga cabo ugu yaraan hal mar bishiiba
- Isticmaal nadiifiyaha biyaha oo waafaqsan heerka NSF ee suntan ledhka



Goorma ayaa la bedelka ay tubooyinka gurigeyga soo gala?



Qeybta mashruuca ee laga shaqeynayo sanad kasta ayaa la doortaa taas oo ku saleysan dhawr qodob, oo ay ka mid tahay kharashka ku baxaya.



Markii ay suurogal tahay, bedelka tubooyinka waxaa lagu xiriiriyaa mashaariicda kale ee kaabayaasha dhaqaalaha ee mashaariicda, sida dayactirka khadka weyn ee biyaha iyo dhismaha wadooyinka.



Bedelka tubooyinka waxaa muhimadda la siiyaa dadka nugul, iyada oo xooga la saarayo xaafadaha ay ku badan yihiin caruurta da'doodu ka yar tahay shan sano.



Mulkiilayaasha guryaha waxaa la wargelinayaa marka la soo gaaro oo gurigooda laga bedelayo.

La soo xiriir



651-266-6820



lead@stpaul.gov



stpaul.gov/lead-free



Para más información, póngase en contacto con el equipo de SPRWS “Libre de plomo” en el 651-266-6820. Se le facilitará un traductor.

Kom paub cov ntaub ntau ntawv ntawv, tiv tauj Lead Free SPRWS pab pawg ntawm 651-266-6820. Yuav muaj ib tus kws txhais lus rau koj.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad, la xiriir Barnaamijka SPRWS ee 651-266-6820. Iyaga ayaa turjubaan la imanaya.